



Gu'ga-Jiilaalka 2011

Diyaar ma utahay Benson? Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waa u caynaanka u hayaa waxbarashadda farsamadda gacanta ee Dugsiyadda Barnaamijyadda Gaadhka ah, dhisaya soooyaal lasoo hayeey ku dhawaad 100 sanadood. ugsiga Sare ee Benson Polytechnic waxaa uu bixinayaa mahaj qani ah iyo tababar ardayda u diyaarinaya kulliyadda iyo khibrad sarreysa, shaqooyinka la socda qarniga 21-aad ee lagu gaadho dhaqaale wanaagsan.

Wasaaradda Waxbarashadda ee Oregon waxa ay Benson ku qiimeysay "Kan ugu wanaagsan" dib-u-eegidii ugu dambaysay ee dugsiyadda

Benson waa barasho dhab ah ee nolol dhab ah.

Tababareyaal aqoontoodu sarreyso ayaa waxay isku dhafaan aqoonta sare ee farsamada iyo manhajka waxbarashada ee aasaaska ah si loo helo aqoon dhammeystiran. Waxay ardayda ka billaabaan iyagoo wax ka ogaanaya waxyaabaha ay daneeyaan iyo, marka ay qallin jebiyaan, in ay xusheen iyo qaateen shahaadada farsamo gaar ah iyo/ama heleen dhibcooyinka kulliyadda. Ardayda hore uga qallin jebiyay Benson si kalsooni ku dhisan ayeey u yiraahdaan, shahaadada Benson Polytechnic waa tigidhka guusha..

"Ardayda ka qalinjebiya Benson waxa ay diyaar u yihiin nololsha dugsiga kadib - hadii ay dooran lahaayeen Jaamacad, ama kulliyadaha bulshadda, barnaamijka xirfadaynta ama shaqadda. Aradydeenu - iyo howlwadeenadda, waalidiinta iyo xubnaha beesha ee caawiya iyagga - waxa ay kala tagaan Benson qorshe, iyo xirfadii ka dhigi lahayd in ay sidaa udhacdo." Carol Campell, Maamulaha

Maxaad xiiseynaysaa?

Manhajka Benso waxay bixiyaan daruus culus, ee lagu dhiso xirfadda iyo khibradaha ama tababarka seddex khibrad aad loogu baahan yahay, iyadoo mid kasta uu leeyahay dhowr qaybood oo lagu takhasuso:

Akadeemiyadda Tiknoolojiyadda Isgaarsiinta

- Tiknoolojiyadda Sawirrada/Fidiyowga
- Farsamada Sawirrada/Fidiyowga Internetka
- Warbaahinta Raadiyaha KBPS (saldhigga radiyowga dadweynaha ee ardayda)

Akadeemiyadda Sayniska Caafimaadka

- Xirfadaha Caafimaadka
- Kalkaalisada/Shahaadada Kalkaalisada
- Kalkaalisada Caafimaadka Ilkaha
- Kalkaalisada Farmashiyaha

Akadeemiyadda Injineeriyadda & Farsamada Warshadaha

- Tiknoolojiyadda Gaadiidka Dhulka/Gaadiidka Cirka
- Tiknoolojiyadda Dhismaha (ay ku jirto dhismaha guryaha)
- Tiknoolojiyadda Kombiyuutarka
- Tiknoolojiyadda Korontada
- Tiknoolojiyadda Warshadaha

"Ardayda caafimaadka ilkaha ee Benson waa kuwa ugu fiican: waxayna ardayda kale ee caafimaadka ilkaha u yihiin tusaale ku dayasho mudan."

- — **Kuhn Marshall, DMD**, oo ay tababar ahaan uga shaqeeyaan ardayda caafimaadka ilkaha ee Benson

Mustaqbal dhaqaalihiiisu wanaagsanyahay.

- **Isdiiwaangelinta 2011-12:** 889
- **Habeenka Macluumaadka Qoyska;** Khamiis, Feb. 9, iyo Arbaco, Feb 22, 6 fiidnimo.-7:30 fiidnimo
- **Arday martigeli. Maalin badhkeed;** in aad sii qorto waa shardi. Talaado, Feb. 7, iyo Arbaco, Feb. 8.
- **Bandhig Technology-ga ee Sanadlaha ah;** Khamiis, Feb. 16, iyo Jimce, Feb. 17, 6 fiidnimo.-9 fiidnimo.

Ardaydeena

Ardayda Benson waa:

- **Arday kala jaad ah** – Benson waa dugsiya sare ee ku yaal Waqooyiga-Galbeed ee ay ku badan yihiin arday kala jaad ah, iyna isku tiro yihiin ardayda caddaanka, Laatiinka, Mareykanka Madow iyo Mareykanka Aasiyaanka ah. Waxay dhiirigeliyaan bey'ad la isku qaddariyo iyo fahmo oo ardayda u diyaarinayso in ay horumar ka gaaraan mujtamaca caalamka.
- **Arday Ku Hawlan** – Waxay Benson bixiyaan hawlo la xiriiira waxbarashada, oo ay ka mid yihiin ciyaaraha ataleetikada; naadiyada loolanka farsamada ee National Honor Society; Skills USA iyo HOSA; kooxaha ardayda sida Robotics Club iyo Diversity Club; munaasabadaha loo yaqaan *homecoming*, *prom* iyo kuwo kale. Kulanka Kala Duwanaashada Sanadkii waa meel ay ardayda ku soo bandhigaan aqoontooda iyo dhacdooyinkii sanadka.
- **Arday Xoogga Saarta Waxbarashada Kulliyadda iyo Xirfadda** – Marka seddex loo qaybiyo laba qaybood ka mid ah ardayda Benson marka ay qallin jebiyaan waxay durbadiiba galaan kulliyad laba sano ama jaamacadda afarta sano. Boqolkiiba 15 kalena waxay galaan dugsiyada xirfadda/ farsamada, iyadoo inta kale ay billaabaan shaqo ama wax kale.
- **Arday Kalsooni Qabta** – Ardayda Benson waxa ay bartaan ama aha in ay shaqo qabtaan oo kaliya balse sida ay uga mid noqon lahaayeen dadweynaha shaqeeya. Waxaa ay bartaan sida xirfaddooda ay u soo bandhigaan, sida ay qortaan warbixinta shaqada iyo waayo aragnimada, sida loogu diyaar-garobo wareysiga shaqada, khudbad jeedinta, ra'yi baxsashada, sida macluumaadka loo xafido, sida dhibaatooyinka loo xalliyo iyo sida koox ahaan loo shaqeeyo. Benson waxay awoodda saaraan dhismaha guud ee ardayga: Waxbarashada. Xirfadaha. Shakhsiyadda.

"Benson waxaa ay ii diyaarinaysaa waxyaabaha aan u baahanahay in aan barto mustaqbalka. Waxaan ku kalsoonahay in aan shaqo heli doono marka aan qallin jebiyo."— **Meisha Rankins**, ardayad sanadka u dambeeya ee kalkaalisada caafimaadka oo tababarantaysa Portland VA

Mustaqbal dhaqaalihiiisu wanaagsanyahay

Shaqadda saacadiiba ee qaybaha takhasuska Benson:

- **Registered Nurses: \$36.88**
- **Dental Hygienist: \$37.64**
- **Graphic Designers: \$19.94**
- **Art Director: \$31.68**
- **Camera Operator: \$22.95**
- **Auto Mechanic: \$18.93**
- **Electrician: \$31.66**
- **Tool Makers: \$24.14**

Isha: Oregon Employment Department [2011]

Macluumaad dheeri ah ka eeg www.pps.net ama www.pps.net/schools/benson

Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waa shaqaaleye iyo bare caddaalad ku dhisan.

